

WAXYAABAHA JOOGTADA LOO QABTO IYO XEERARKA GOODTA DEGAANKA

Ka hor inta aanad u soo guurin

- Adiga/idinka ayaa furayaasha qaadanaaya oo kuwaas saxeexaaya maalinta aad ku soo guureysaan.
- Eegitaanka guriga iyo alaabta oo lala sameynaayo shaqaale ka socda Servbo.
- Si wada jir ah ugu eegaaya shaqaalaha sharciyada soo socda oo iyaga aqbalaaya qoraal ahaan.

Intaad adigu/idinku nala nooshihiin

- Guriga waxa kaliya loogu talagalay in la deganaado oo kaliya ah. Kaliya dadka loo soo ogolaadey inay ku noolaadaan hoyga ayay tahay inay deganaadaan guriga iyadoo aan la oggoley marti kula seexata.
- Adigu/Idinku waxa guriga idiinku imaan kara marti idin soo booqatey xilliga maalintii ilaa iyo saacada 20:00.
- Adigu/idinka ayaa masuul ka ah inaydaan dhibin deriska iyo dadka kale ee deggan aagga wakhti kasta oo ah maalinta ka mid ah. Saacada 22:00 kadib ayay aad muhiim u tahay in aad maskaxda ku hayso in aanu buuq laheyn guriga.
- Ilaali/u tudh guriga iyo sharaxaada dhex taala. Guriga waa in kuwa ku nool/degenan ay si joogto ah u nadiifiyaan . Haddii wax la jabiyo, waa in taas la wargaliyo Extensor Fastigheter (lambarka telefoonka 0735-19 03 65 ama e-maylka info@extensor.se)
- Adiga/idinku waa in aydaan aqalka keenin wax alaabtiina ah.
- Adiga/idinka ayaa masuul ka ah hubinta in guriga hortii ay nadiif tahay. Xusuusnow in qashinka aad ku tuurtaan meel sax ah.
- Marka adigu/idinku isticmaashaan qolka qasaalada/dhar dhaqista waa in la nadiifiyo ka hor inta aanu qofka kugu xigaa wax ku maydhan. Filterka waa in la nadiifiyo, wax saabun ama dawada carfisada ah aanay ku daa'danin agagaarka/dusha mashiinka dharka lagu dhaqo. Kaliya isticmaali qolka dharka lagu dhaqdo wakhtiyada aad adigu/idinku qabsateen.
- Lama oggola in sigaar, shiishad iwm lagu cabbo ama lagu isticmaalka daroogo guriga ama jaranjarada.
- Lama oggola in ay xayawaanka guriga lagu haysto.
- Adigu/idinku waxaad masuul ka tihin in qalabka guriga loo isticmaalo kaliya waxa loogu talagalay, tusaale ahaan, in shoolada/cunto kariyaha aan loo isticmaalo ujeedooyin kale oo aan ahayn cunto karinta.

Marka adigu/idinku aad ka sii guureysaan

- Waa in guriga la nadiifiyo oo lagu soo celiyo xaalad la mid ah tii markii aad adigu/idinku ku soo guurteen.
- Adigu/idinku waxaad masuul ka tihin inaad alaabtiina xidhxidhataan oo aad isku diyaarisaan guuritaanka.
- Waxaas si wadajir ah shaqaalaha ka socda Servbo aad idinku/adigu ugu heshiinaysaan waqti si aad ugu wareejisaan furaha.

Waxyaalaha kale

- Shaqaale ka socda Servbo waxay xaq u leeyihiin inay soo galaan guriga iyadoo kormeer joogto ah lagu sameyn doonaa. Sida caadiga ah, ayuu ku soo wacaya shaqaalahu booqashada ka hor.
- Servbo wuxuu xaq u leedahay in nay u diido dadka aan ku noolayn guriga.
- Dagaal ama hanjabaad dagaal oo ku lid ah shaqaalaha Servbos looma ogola iyadoo taasi keeni doonta in si degdeg ah loo joojiyo deganaanshaha. Booliiska ayaa sidoo kale lagaa soo dacweyn karaa.
- Haddii sharciyada kor ku xusan aan la raacin, ayaad adigu/idinku lumin doontaan xaq u lahaansha hoyga.